



# Xaqiiqooyinka Degdegga ah ee Nooca Omikron

(La Cusbooneysiiyay Diseembar 17, 2021)

Omikron ayaa laga helay gudaha Oregon waxaana la filayaa inuu keeno kor u kac isbuucyada soo socda waayo waxay u muuqataa inuu si dhakhso leh oo fudud u faafayo marka lala barbardhigo noocyada kale ee COVID-19.

**Nooca Omikron waxaa si firfircoon u darsaya saynisyahano ku sugan adduunka oo dhan.**

- **Isku gudbinta:** Waxaa si cad isku soo taraya in nooca Omikron si degdeg ah oo fudud u faafayo marka lala barbardhigo nooca Delta, inkastoo aynan weli ogeyn inta ay le'eg tahay.
- **Darnaanta cudurka:** Xog horudhac ah ayaa tilmaamaysa in nooca Omikron uu keeni karo cudur ka yar darnaanta nooca Delta, balse tani weli daraasad ayaa ku socota.
- **Waxtarka tallaalka:** Waxay u muuqataa in tallaallada COVID-19 ay sii wadaan inay ka hortagaan cudurrada daran, oo tallaalada xoojinta ah waxay bixiyaan lakab dheeraad ah oo kahortag ah oo ka dhan ah caabuqa iyo cudurka daran.
- **Daawaynta:** Lama garanayo waqtigaan sida ay waxtarka uleedahay daaweyntu ooga hortagi doonto caabuqa daran uu sababa Omicron. Tani waxaa si firfircoon ah u baaraya saynisyahannada adduunka oo dhan.

**Waan garanaynaa sida aan nafteena iyo dadka kaleba u ilaalin lahayn.**

- Is tallaal hadda haddii aadan tallalneyn. Tallaalku waa kahortagga ugu fiican ee la isga ilaaliyo jirrada halista ah iyo gudbinta cudurka.
- Haddii aad u qalanto xoojiye, dhigo ballantaada maanta. Tallaalada xoojinta ah waxay bixiyaan lakab dheeraad ah oo kahortag.
- Xiro afxir marka aad ka baxdo guriga.
- Ka fogow dadka ka baxsan gurigaaga haddii aadan garanayn heerka tallaalkooda.
- U dhaq gacmaha si joogta ah.

**Caabuqyada sida SARS-CoV-2, caabuqa sababa COVID-19, si joogto ah ayey isku dooriyaan ama isku beddelaan.**

Markay tahay Noofeembar 24, 2021, Ururka Caafimaadka Adduunka ayaa Omikron u aqoonsaday nooc walaac leh. Nooca Omikron wuxuu u muuqdaa mid la isku gudbin karo marka lala barbardhigo nooca Delta wuxuuna ka kooban yahay isbeddello badan oo unageed oo kor u qaadaya walaaca laga qabo waxtarka tallaalka oo yaraada.

**Maamulka Caafimaadka Oregon waxay si dhow ula socdaan Omicron.**

Oregon waxa ay leedahay mid ka mid ah hababka ilaalinta nooca ugu adag ee Maraykanka.

**Markaan wax badan ka barano, waxaan si dhakhso ah u wadaagi doonaa macluumaadka ku saabsan sida ugu wanaagsan ee aad u ilaalin karto naftaada oo aad u ilaalin karto kuwa aad jeceshahay iyo beeshaada.**

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).